



NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.™

Helping Hand™

Health Education for Patients and Families

24-Saac Tilmaamaha Qaadida Muunada Kaadida

24-Hour Urine Specimen Collection Guidelines (Somali)

Dhaqtarkaaga wuxuu amray in 24 saac lagu baaro kaadida. Tani waxay la micna tahay waa inaad keydisaa kaaddida (kaadida) canugaaga oo 24 saac. Kaadida waxaa laga qaaday:

(Magaca Baaritaanka)

Waxaad u baahaneysaa

- ☐ Weelka qaadista kaadida oo nadiif ah. Dumarku waxay isticmaali doonaan caaga suuliga si ay ku qaadaan ama ugu qabtaan kaadida (Sawirka 1). Ragu waxay isticmaali karaan caag kaadi, oo la qaadi karo (si fudud loo qaadi karo) ama weel wayn oo loogu talagalay kaadida.
- ☐ Weel wayn oo loogu talagalay kaadida (Sawirka 2)

Sida loo calaameeyo caaga


1. Magaca cunuga sharciga ahoo dhameystiran – buuxi magacyada koowaad iyo magaca labaad, hingaada saxda ah



Sawirka 1 Dumarku waxay isticmaali karaan caaga suuliga si ay ku qaadaan ama ugu qabtaan kaadida.

2. **Mid** ka mid ah aqoonsadayaasha gaarka ah:

- Taariikhda dhalashada **ama**
- Lambarka Aqoonsiga Bukaanka **ama**
- Lambarka diiwaanka Nationwide Children's Hospital (Isbitaalka Qaran ee Caruurta).



Sawirka 2 Kaadida waxaa lagu shubi doonaa weel lagu kaydiyo oo wayn.

Waxay noqon kartaa mid aad kuu caawisa in aad samayso talaabada 1 iyo 2 kahor inta aadan bilaabin aruurinta.

3. Taariikhda baaritaanka la bilaabay **iy**o taariikhda ay dhamaatay (Maalinta/Bisha/Sanadka)
4. Taariikhda baaritaanka la bilaabay **iy**o taariikhda ay dhamaatay (kudar waqtiga subaxdii ama galabkii)

Goobaha caafimaadka ee Nationwide Children waxaa laga yaabaa in ay ku siiyaan diiwaangalin sumaddeedu tahay EPIC si aad u geliso weelka wayn.

Sida loo aruuriyo muunada kaadia 24-saac

1. Go'aanso maalinta la sameynayo baaritaanka marka canugaaga uu guriga joogayo maalinta oo dhan.
2. Maalinta baaritaanka, canugaaga miyuu faaruqiya kaadi galeenkiisa ama kaadi galeenkeeda (ku kaadi) musqusha isla markaasba marka aad hurdada ka kacdid kadib. Kaadida bisho ka raaci musqusha.
3. **Baaritaanka wuxuu ku bilowdaa hadeer faaruqa kaadi galeenka. Qor taariikhdaan iyo waqti uu bilaabanaayo taariikhda ku qoran weelka.**
4. 24 Ta saac ee xigta, cunugaaga waxa uu u baahan doonaa inuu ku kaadiyo weelka kaadida lagu qaado waqti kasta oo uu aado musqusha. Dumarku waxay isticmaali karaan caaga musqusha. Ragu waxay isticmaali karaan caaga kaadida ama waxay ku kaadin karaan isla weelka lagu kaydinaayo kaadida. Haddii aadan haysan caaga musqusha ama kan lagu kaadiyo, waxaad isticmaali kartaa weel kale oo nadiif ah.
5. Kahor inta aadan isticmaalin weelka caaga ah markii koowaad, ku dhaq saxanka saabuunta iyo kadib raaci ugu yaraan 10 jeer ee biyaha tuubada. Si buuxda u ogoloow inay ku qalasho hawada.
6. Haku saxaroon (saxaro) hana ku darin kaadida haddii kale baaritaan waxaa loo baahan doonaa in lagu celiyo.
7. Ku shub kaadida weel wayn oo lagu kaydiyo kadibna ku xir fur adag. Ka daxadar inaad daadin wax kaadi ah.
8. Haddii aad isticmaalayso weelka kaadida lagu kaydiyo, kaliyaku **dhaq biyo**. Dib ugu celi musqusha si aad u xasuusato marka danbe oo aad u baahan tahay. Si buuxda u ogoloow inay ku qalasho hawada

9. Weelka wayn ee kaadida lagu kaydiyo geli qaboojiyaha. Kaadida waa in lagu hayaa qabow waqtiyada oo dhanba. Haddii qaboojiyahaagu lahayn firaaqo, waxaad ku kayd in kartaa qaboojiye aad baraf dusha ka saartay. Ku dar baraf badan sida loogu baahanyahay in kaadida la qaboojiyo.
10. Mar kasta oo uu cunugaagu kaadiyo maalintii iyo habeenkii, raac tilmaamahaan 4 illaa 9.
11. Maalinta xigta (mar u dhaw isla waqtigii aad billoowday maalintii koowaad), u ogoloow cunugaagu inuu ku kaydiyo weelka kaadida markii ugu danbeysay. Kudat weelka wayn ee kaadida lagu kaydiyo. Tani waxay gabogabo u tahay 24-saac oo kaadi aruurin ah.
- 12. Ku dul qor taariikhda iyo waqtiga kaadida ugu danbeysay la aruuriyay.**
13. Ku qor dhamaan daawooyinka, oo ay kujiraan daawooyinka aad dukaamada, feetamiinada, daawooyinka dhirta, ee uu qaatay cunugaagi 24 tii saac ee ugu danbeysay inta kaadida la aruurinaayay.

Warbixinta kale

- U qaad kaadida shaybaarka (Laabka) Xarunta Adeega Sheybaarka sida ugu dhaqsiiyaha badan ee suurtoogalka ah, **24 saac kadib dhammaadka kaadida**. Ku haay kaadida qabow.
- Hubi in kaadidu aysan baaritaanka ku fariisan marka lagu sameenaayo: amylase, arylsulfatase, immunoelectrophoresis, micro-albumin, pregnanetriol, protein ama uric acid.
- Waxaa lagaaga baahan karaa inaad baaritaanka billoowdo mar labaad haddii wax kamid ah kaadida daataan, haddii aad iloowdo inaad qaar kaydiso ama ay kujirto saxaro. Haddii aad ku qasban tahay inaad dib u billowdo baaritaanka, waa caadi inaad isticmaasho isla weelkii aadna ku kaydiso kaadida. Ku shub xoogaa kaadi ah, nadiifi weelka kadibna u ogolloow inuu qalalao. Kadibna raac tilmaamaha 1 illaa 13.

Dooqyada Geynta

Inta lagu jiro maalinkii:

- Xarunta kasta oo Adeega Sheybaarka ah ama Nationwide Children's U dhow Guriga™ (Close To Home™) Xarunta inta lagu jiro saacadaha ganacsiga caadiga ah. Haddii aad rabto inaad ogaato saacadaha ganacsiga iyo goobaha, fadlan soo wac Adeegyada Sheybaarka ee (800) 934-6575 ama booqo NationwideChildrens.org/Lab.
- Sheybaarka Nationwide Children's Orange ee ku yaala 555 S. 18th Street, Columbus, Ohio 43205. Saacadaha shaqadu waa Isniinta illaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo illaa 7:00 fiidnimo iyo Sabtida, 8:30 subaxnimo illaa 3:30 galabnimo.

Fiidkii:

- Waaxda Ogolaanshaha Isbitaalka ee Nationwide Children's ee xarunta guud. Saacadaha geynta waa Isniinta illaa Jimcaha, 7:00 fiidnimo illaa 11:30 habeynimo.

Fadlan ha geynin muunada kaadida ah Waaxda Degdega.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, waydii dhakhtarkaaga ama kalkaalisada, ama wac shaybaarka oo lambarkoodu yahay (800) 934-6575.